

Machadka Qaranka ee
Caafimaadka Dadweynaha iyo
Wasaarada Deegaanka ee
Wasaaradda Caafimaadka,
Daryeelka iyo Ciyaaraha

Ciwaanka Lagu soo celinaayo: RIVM-DVP North East, PO Box 7020, 8007 HA ZWOLLE

Ku socota Waalidka/Daryeelaha

Lambarka Adeegga
Muwaadinta

Taariikhda: xxx 2023
Mawduuca: Talaalada Ilmahaaga

Lifaaq:

- Kaararka talaalka
- Xaashi ku saabsan talaalada carruurtada jira sagaal sano
- Warqad ka timid Adeegyada daryeelka caafimaadka/GGD

Waalidka/daryeelaha qaaliga ahoow,

Marka ay tahay ama qiyaas ahaan marka uu jiro qiyaas ahaan sagaal sano, cunugaaga waxaa lasiin doonaa labo talaal. Waana talaalada DTP iyo MMR. Cunugaaga waxaa lagu casuumi doonaa inuu yimaado uuna qaato talaalada.

DTP iyo MMR

Talaalka DTP wuxuu ka hortagaa gawracatada, teetanada iyo cudurka dabaysha. Talaalka MMR wuxuu ka hortagaa cudurada qaamo-qashiirta, jadeecada iyo jadeecada rubella. Waxaad xog badan ka heli kartaa oo ku saabsan arrintaan xaashida kujirta warqadaan.

Halkee ka heli kartaa talaalada?

Boqshadda dhexdeeda, waxaad ka heli doontaa warqad ka socota adeegyada daryeelka caafimaadka dhallinyarada. Warqadaan waxaa ku qoran meesha iyo goorta uu ilmahaagu qaadanayo talaalka. Soo qaado dukumiintiyada soo socda marka aad imaanayso si aad u qaadato talaalka:

- Kaararka talaalka (ee kujira boqshadda)
- Cadeynta talaalka ilmahaaga

Haddii ilmahaagu aanu weli qaadan dhammaan talaalada, waxaad kaararka talaalka oo dheeraadka ah ka heli doontaa boqshadda.

Maxaa loo qaadanayaa talaalka?

Barnaamijka Talaalka Qaranka waxa uu carruurta ka ilaaliyaa 12 cudur oo faafa oo halis badan. Waxaan arrintaan sameyneynay muddo 65 sano ah, sidaa daraadeed cudurradaan waxay ku dhawaadeen inay baaba'aan. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cudurrada ka heli kartaa warqada.


Warqada Xogta Bukaanka

Tallaalada si fiican ayaa loo tijaabiyey. Waa badqab. Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu weli dareemo waxyeelo, sida qandho fudud ama xanuun uu ka dareemo gacanta. Ma jeclaan lahayd inaad oggaato waxa laga helo talaalada? Akhri warqadaha xogta bukaanka. Waxaad warqadahaan ka heli karaa bartaan rijksvaccinatieprogramma.nl/bijsluiters.

Wax su'aalo ah ma qabtaa?

Booqo rijksvaccinatieprogramma.nl
ama [booqo thuisarts.nl](https://thuisarts.nl).

Xushmad ku dheehan,



Jeanne-Marie Hament, Dhakhtar

0000000005217278